# Jiheynada Maamulka 4.30.071-AD

# Habraacyada Cabashada Dhacdada Eexashada Ka hortaga Cunsuriyada iyo Ka hortaga Dulmiga Bulshooyinka Waxbarashada

**Hordhaca**

Dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo martida dugsiyada dadweynaha waxay xaq u leeyihiin inay wax ku bartaan, ka shaqeeyaan, oo ka qeybqaataan jawi badqab ah oo aan laheyn takoorid, dhibaateyn, iyo cabsi gelin.

**Qeexitaano**

1. “Ka hortaga cunsiriyada” waxaa loola jeedaa ka hor imaanshaha firfircoon ee cunsiriyada iyadoo loo marayo u doodis isbadelo lagu sameeyo xeerka, dhaqamada, iyo dabeecadaha.
2. “Naceybka-Yahuuda” waxaa loola jeedaa caqiidooyinka iyo dhaqamada ka dhanka ah dadka sababtoo ah waa Yuhuudi. Waxay qaadan kartaa qaab eexasho dhaqameed sida cuqdada ama aragtida la aaminsan yahay ee ku saabsan Yuhuudda iyo/ama dadaalka siyaasadeed ee lagu go'doominayo ama lagu dulminayo.
3. “Dhacdada eexda” waxa loola jeedaa cadowtinimada uu qofku ugu muujinayo qof kale, taas oo la xidhiidha isirka, midabka, qoomiyada, diinta, aqoonsiga jinsiga, jinsiga uu qofku doorbido, naafanimada, ama asalka qaran ee qofka kale kaas oo baadhis dembi ama dacwad ku oogid aanay macquul ahayn ama aanay habboonayn. . Dhacdooyinka eexda waxa ka mid noqon kara hadal ama dhaqan lagula kaco ama ku waajahan mid ka mid ah kooxihii hore ee dadyowga.
4. "Aaminaada macquulka aheyn" waxaa loola jeedaa naceyb aan loo dulqaadan ee ammaana kooxda qofka isla markaana hoos u dhiga xubnaha kooxaha kale.
5. "Cowdaha" waxaa loola jeedaa dadka soo gudbiya cabashooyinka rasmiga ah iyo dadka soo wargelinayo dhacdooyinka eexashada, iyadoon laga eegin haddii cowdaha uu dhibane yahay. Si la mid ah, ereyga "cabashada" waxaa ku jira warbixin ama cabasho walba.
6. “Kala duwanaanshaha” waxaa ku jira dhammaan siyaabaha ay dadka u kala duwan yihiin, oo waxay ka koobantahay dhammaan sifooyinka kala duwan ee hal shaqsi ama koox uga duwanyihiin kuwa kale.
7. "Hadalka Naceybka" waxaa loola jeedaa hadal qoran, hadal ah, muuqaal ah, ama astaanta ku saleysan eexashada jinsiyada, midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafonimada, ama asalka dhalashada.
8. "Loo dhamida" waxaa loola jeedaa ficilka sida dhab ah u keenayo shaqsiyaadka iyo/ama kooxaha dhaqan ahaan looga reebay nidaamyada,

howlaha, iyo go'aanada iyo xeer sameynta oo qaab wadoo wadaag ah.

9. "Bayaanada takoorka" waxaa loola jeedaa hadalka maalinlaha, aan hadal aheyn, iyo eexashada cad, bahdilka, ama cayda, ha ahaato ula kac ah ama aan ula kac aheyn, kuwaasoo xiriiriyo fariimaha colaadeed, hoos u dhigida, ama xumaanta ee ku aadan dadka la beegsado ee ku saleysan kaliya xubinnimadooda kooxda la faquuqo.
10. "Dumar naceybka" waxaa loola jeedaa naceybka, quursiga, ama naceybka ka dhanka ah dumarka.
11. "Dulmi" waxaa loola jeedaa ual dhaqanka nidaamsan iyo hay'ada ee koox ay beegsadeen koox aan diirada aheyn halkaasoo ay ka jiraan dheelitirnaan la'aanta awooda bulshada iyo dhaqaalaha.
12. "Cunsuriyada" waxaa loola jeedaa nidaamka awooda halka hal koox ay leedahay awooda lagu sameynayo takoorida nidaamsan ee loo marayo xeerarka waxbarashada iyo hab dhaqamada bulshada iyo qaabeynta aaminaada dhaqanka iyo qiyamyada taageero xeerarkaas iyo dhaqamada cunsiriyada. Cunsuriyada waxaa lagu muujiyaa sadex siyaabood: shaqsi, hay'ad iyo dhaqan ahaan. Shaqsiga cunsuriyada waxaa laga wadaa sshaqsiga aaminsan, dabeecadaha, iyo falalka shaqsiyaadka taageera iyo/ama kiciya cunsuriyad oo siyaabo miyir leh iyo aan miyir laheyn. Cunsuriyada dhaqanka waxaa laga wadaa aaminaada, qiyamyada, iyo caadooyinka qiimeeyo sida la xiriirto dadka cadaanka ama cadaan ahaanshaha sida tooska ah uga wanaagsan ama heerka. Cunsuriyada hay'ada waxaa laga wadaa gaar ahaan siyaabaha ay xeerarka iyo dhaqamada hay'ada u abuuraan natiijooyin kala duwan oo kooxaha jinsiyada kala duwan iyo, iyadoo xeerarkaas laga yaabo inaysan abid si cad u sheegin koox walboo jinsiyada ah, saameynadooda waa abuurista faa'idooyinka dadka cadaanka ah iyo qasaaaraha iyo dulmiga dadka midabka ah.
13. "Eedeysanaha" waxaa loola jeedaa qofka lagu soo eedeeyay inuu gesytay dhacdada eexashada.
14. "Cadaanka Wadaniyada" waxaa loola jeedaa dhaq dhaqaaqa bulsheed oo weyn oo u ololeeya sareynta cadaanka ama fikradaha gooni u goosadka cadaanka, oo inta badan diiradda saara hoos u dhigida dadka midabka, haweenka, soo galootiga, Muslimiinta, iyo dadka Yuhuuda ah.
15. "Sareynta Cadaanka" waxaa loola jeedaa fikrada ah in dadka cadaanka ah iyo fikradaha, afkaaraah, caqiidooyinka, iyo ficilada dadka cadaanka ah ay ka sareeyaan dadka midabka ah iyo fikradahooda, aragtiyadooda, caqiidadooda, iyo tallaabooyinka.

# Jiheynada Maamulka 4.30.071-AD

# Habraacyada Cabashada Dhacdada Eexashada Ka hortaga Cunsuriyada iyo Ka hortaga Dulmiga Bulshooyinka Waxbarashada

**Habraacyada Jawaabta**

Dadka ay saameysay dhacdada eexashada waa in si balaaran loo qeexaa si loogu daro shaqsiyaadka dhacdada lagu aadiyay, sidoo kale sida ardayda ku jirta bulshada dugsiga balaaran oo ay u badantahay inay saameysay dhacdada. Shaqaalaha degmada ee ka xog hela eexashada dhacdada ee dhismaha dugsiga ama inta lagu jiro barnaamijka, waa inay qaadaan tallaabooyinka xigga:

1) U sheeg dhacdada Maamulaha dugsiga kaasoo:

   a) Qaadayo tallaabo degdega ah iyadoo mudnaanta la siinayo badqabka iyo fayo qabka dadkoo dhan ee ay saameysay kaasoo sameynayo qorsho looga hortago inay dhacdo waxyeelo dheeraad ah ee ku aadan dadkaas ay saameysay.

   b) Kala tasho Waaxda Xuquuqaha Rayidka iyo Agaasimaha Sare ee Dugsiyada si loo go'aamiyo in Sinnaanta Jinsiga iyo Cadaalada Bulshada (RESJ), Adeegyada Taageerada Ardayda, iyo Xiriirida u baahan la keeno si loo sameeyo jawaabta taageerada ee bulshada dugsiga.

   c) Ku dar habraac walboo dib u jaheyn ah iyo qeybaha waxbarashada ee ka hadlaya taariiqda iyo saameynta naceybka, iyo sidoo kale sida qeybaha habraaca si loo hubiyo badqabka, bogsashada, iyo hay'ada kuwa ay saameysay naceybka; la xisaabtanka; iyo bedelka dadka waxyeelada geystay, sidoo kale sida badelka xaaladaha keenay waxyeelada.

   d) Ku dar borotokoolada isgaarsiinta oo siinaya dhammaan dadka ay saameysay warbixinta la xiriirto baaritaanka.

      a. Macluumaadka la siiyo dadka lagu aadiyay dabeecada iyo qofka geystay dabeecada waa inuu ku jiraa in baaritaanka la bilaabay, tallaabooyinka la qaaday si looga hortago soo noqoshada, natiijooyinka baaritaanka iyo go'aaminta ugu dambeyso ee ku saleysan natiijooyinkaas, illaa iyo xad u ogolaaneyso sida waafaqsan sharciga gobolka iyo faderaalka, tallaabooyinka lagu qaado sida waafaqsan qofka geystay

dabeecada oo lagu daaweynayo dabeecada iyo, goorta quseeyo, tixraaca sharciga mamnuucaya siideynta iyo sharaxaada sida sharcigaas u quseeyo xaalada hadda.

b. Warbixinta lagu siiyay ardayda bulshada dugsiga oo u dhow inay saameyso dhacdada waa in lagu daraa in baaritaanka la bilaabay iyo tallaabooyinka lagu qaaday in lagu hortago soo noqoshada. Isgaarsiinta waa inay:

i. Cambaareysaa falka

ii. Xoojisaa qiyamyada bulshada PPS iyo Dugsiga

iii. Qiro saameynta falka uu ku yeesho bulshada

Iv. Tixraac tallaabooyinka la qaaday si wax looga qabto falka ku xirnaanta xeerka degmada.

2) Baaritaanka Cabashada

a. Wargelinada/cabashooyinka dhacdada eexashada waxaa loo gudbiyaa Waaxda Xaquuqaha Rayidka. Agaasimaha Xaquuqaha Rayidka ayaa la shaqeynayo maamulayaasha dugsiga si loo go'aamiyo heerka jawaabta. Maamulka dugsiga ayaa ku baarayo cabashooyinka iyagoo taageero ka helayo Waaxda Xaquuqaha Rayidka iyo xaaladaha qaarkood, Agaasimaha wuxuu u xilsaarayaa baare gaarayo go'aaminta ku xadgudubka xeerka iyo, xaaladaha qaarkood, haddii sharciyada xaquuqaha rayidka lagu xadgudbay oo baahida loogu wargelinayo hay'adaha dibada. Baaritaanada waxaa lagu dhameynayaa 30 maalmood gudahood illaa dhinacyada ku heshiiyaan in la ogolaadaan waqti dheeraad ah.

b. Markii la helo cabashada/wargelinta, baaraha ama Maamulaha wuxuu siinayaa ogeysiin qoraal ah Cowdaha iyo Eedeysanaha nidaamka cabashada.

c. Xaaladaha qaarkood, qorshaha taageerada ku meel gaar ah oo hirgelin ah ayaa loo sameynayaan Cowdaha iyo/ama Eedeysanaha.

d. Markii baaritaanka la dhameeyo, Maamulaha aya amarkaas go'aansanayo haddii ay jirto baahida tallaabooyin edbin iyo/ama soo celinta pp wax laga qabanayo.

i. Maamulaha wuxuu si gooni ah ula hadlayaa Cowdaha iyo Eedeysanaha si ay uga hadlaan tallaabooyinka soo celinta, haddii ay isku raacaan labada dhinac. Maamulaha ayaa sidoo kale ogeysiinayo Eedeysanaha tallaabooyin walboo edbin ah oo la qaaday sida ay keentay natiijooyinka.

ii. Maamulaha ayaa kadib la wadaagayo natiijooyinka tallaabada edbinta iyo/ama soo celinta Agaasimaha Xaquuqaha Rayidka oo ujeedooyinka xog aruurin ah. Maamulaha ayaa sidoo kale soo gabagabeynayo qorshaha isgaarsiinta dabagalka, haddii loo baahdo.

e. Cowdaha iyo Eedeysanaha waa la soo ogeysiinayaa gabagabada iyo natiijooyinka iyo xaquuqdooda ay uga racfaan qaataan. Ugu yaraan, warbixinta la bixiyay waa inay ku jirtaa:

1. In baaritaanka la bilaabay;
2. Markii baaritaanka la dhameystiro;
3. Natiijooyinka baaritaanka iyo go'aanka ugu dambeeyo ee ku saleysan natiijooyinkaas; iyo
4. Tallaabooyinka lagu qaaday qofka ama dadka geystay dabeecada takoorida, dhibaateynta, ama cabsi gelinta si loo saxo dhaqanka oo looga hortago soo noqoshada markii ficilada ay si toos ah ula xiriiraan qofka ay saameysay dhacdada. (Haddii kuwa walboo warbixinta kore aan la wadaagi karin, tixraaca sharciga mamnuucaya sii deynta iyo sharaxaada ku saabsan sida sharcigaas u quseeyo xaaladda hadda jirta ayaa la bixinayaa).
5. Nidaamka racfaanka.

f. Haddii cowdaha ama eedeysanaha rabaaan inay ka racfaan qaataan go'aanka, waxay u soo gudbin karaan racfaan qoran Agaasimaha Xaquuqaha Rayidka ama wakiilkooda oo gudaha shan maalmood kalendarka ah kadib helitaanka ogeysiinta natiijooyinka.

g. Agaasimaha Xuquuqaha Rayidka waa inay qirtaan helida racfaanka oo waxay la kulmi karaan dhammaan dhinacyada ku lugleh. Intaas waxaa dheer, Agaasimaha Xuquuqaha Rayidka ayaa dib u eegayo natiijooyinka iyo gabagabada baaraha sidoo kale sida warbixin walboo dheeraad ah ee Cowdaha iyo Eedeysanaha aaminsanyihiin inay quseyso racfaanka. Agaasimaha Xuquuqaha Rayidka ayaa ku soo saarayo go'aanka ugu dambeeyo 10 maalmood gudahooda laga bilaabo dhageysiga rafcaanka.

h. Haddii Cowdaha ama Eedeysanaha aysan ku qanacsaneyn go'aankaan ugu dambeeyo, ama Degmada ay ku guuldareysato inay ku bixiyaan go'aan ugu dambeeyo 90 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso cabashada hore, waxay uga racfaan qaadan karaan midkood Xafiiska Waaxda Waxbarashada ee Xaquuqaha Rayidka Mareykanka ama Waaxda Waxbarashada Oregon.

3) Soo celinta iyo Waxbarashada

a) Degmada waxay sameyneysaa oo hirgelineysaa qoraalo waxbarasho oo taageero leh si ay uga dhigto jaheyntaan maamulka iyo nidaamyada waxbarashada la xiriiro iyo cawaaqiibaha suurtogalka ah ee ay garanayaan shaqaalaha iyo ardayda dugsigoo dhan.

b) Dugsiyada, leh taageerada ka imaaneyso shaqaalaha Degmada, waxay siinayaan fursado wadahadal bulshadoo dhan iyo la talinta looga jawaabayo dhacdooyinka eexashada iyo u diyaariyaan illo qoraalo iyo taageero kale ee ardayda iyo shaqaalaha ay wax uga qabtaan muragada naxdinta leh ee dhacdada. Qoraalada iyo illaha waxaa lagu xirayaa Hamilada iyo qorshaha Xeelada PPS iyadoo la hiigsanayo kobcinta dhaqanka sinnaanta iyo daryeelka jinsiyada.

Waxaa la ansixiyay

**Jiheynada Maamulka 4.30.071-AD**

# Habraacyada Cabashada Dhacdada Eexashada Ka hortaga Cunsuriyada iyo Ka hortaga Dulmiga Bulshooyinka Waxbarashada

8/2023 OSBA: ACB-

AR

Maamulka Sharciga: ORS 326.051; ORS 659.850; OAR 581-022-2312